# AMAANKA ISKOOLADA

Gudiga waxbarashada waxaa ka go'an ka hortaga rabshadaha dhanka dadka ama hantida iskoolada ama hawlaha iskoolka, haday tahay ardayda, shaqaalaha ama dadka kale. Jawi wanaagsan oo dugsiyeed ah waxoo taageeraa amaanka iskoolka iyada oo loo maraayo isticmaalka khayraadka xirfadeed. Xubnaha shaqaalaha ah ee fuliyo tan ama siyaasad kasto oo kale waxay heli doonaan taageero buuxo ee gudiga iyo maamulka.

Isla markaasna , Gudiga sidoo kale waxoo aqoonsan yahay baahida loo qabo in wax laga qabto xaaladaha degdega ah, xaaladaha qalalaasaha ah, iyo dhacdooyinka rabshadaha wato si wax ku ool ah iyo degdeg ah. Siyaasadaan waxaa loogu talagalay in lagu hormariyo qalalaasaha iyo ka hortaga rabshadaha, iyadoo la samaynayo habraacyo wax looga qabanaayo xaaladaha degdega ah iyo maaraynta.

Gudiga waxa uu mas'uul ka yahay qaadashada qorshayaasha amaanka heerka dhismaha ee Degmada oo dhan kuwaas oo abuuraayo hab dhamaystiran oo lagaga hortagaayo rabshadaha, wax ka qabashada xaaladaha degdega ah ee kala duwan, yaraynta saamaynta xaaladaha degdega ah, iyo fududaynta isuduwida ilaha deegaanka iyo Degmada. Qorshaha amaanka heerka dhismaha ee Degmada oo dhann waxaa dib u eegi doono sanad walbo kooxda ku haboon, iyo waa la cusboonaysiin doonaa sida loogu baahdo mudada loo cayimay sharciga iyo qaanuunka.

***<u>Qorshaha Amaanka Degmada ee Dhamaystiran</u>***

## 1. Kooxda Amaanka Degmada oo Dhan

Qorshaha Amaanka Degmada oo dhan waxaa dejin doono Kooxda Amaanka Degmada oo dhan, oo kuwaas oo ay magacaabeen Gudiga Waxbarashada. Kooxda waxay sidoo kale mas'uul ka tahay inay dib u eegaan Qorshaha sanad kasto iyo go'aaminta baahida loo qabo cusbooneysiinta ama wax ka bedelka.

Kooxda Amaanka Degmada oo dhan waxaa ku jiri doono:

a. Wakiilada Gudiga Waxbarashada
b. Macalin, maamul, iyo wakiilada ururka waalidka;
c. Shaqaalaha amaanka iskoolka;
d. Shaqaalaha caafimaadka maskaxda; iyo
e. Shaqaalaha kale ee iskoolka.

Gudiga waxay dooran karaan inay heystaan arday wakiil ah oo ka tirsan Kooxda Amaanka Degmada oo dhan, laakiin dhinacyada sirta ee Qorshaha Amaanka Degmada oo dhan iyo Qorshayaasha Jawaabta Degdega ah ee Heerka Dhismaha malala wadaagi karo, mala soo bandhigi doono, ama malaga hadli doono iyada oo joogo arday wakil ah .

## 2. Qorshaha Amaanka Degmada oo dhan

Qorshaha Amaanka Degmada oo dhan waxaa loogu talagalay in laga hortago ama la yareeyo saameynta xaaladaha degdega ah iyo in la isku duwo isgaarsiinta iyo isticmaalka kheyraadka ee hay'adaha magaalada iyo Degmada, oo ay ku jiraan sharci fulinta, saraakiisha ilaalinta dabka, ambalaas, iyo wakaaladaha kale ee wax ka qabashada xaaladaha degdega ah.

Qorshaha waa inay ku jiraan habraacyada iyo tilmaamaha ee:

a. Isticmaalka xeeladaha ka hortaga haboon iyo ka faragelinta, oo ay ku jiraan:

    i. Isticmaalka dhaqan soo celinta sidii istiraatiijiyad ka hortaga aasaasiga ah iyo faragelinta si waafaqsan *Xeerka Anshaxa* (1400), oo ay ku jiraan:

        1) Qorshayaasha tababarada shaqaalaha ee dhaqan soo celinta si joogto ah; iyo
        2) Tilmaamaha lagu dabaqi karo dhaqamadaan;

    ii. Barnaamijyada tababarka xalinta qilaafaadka aan rabshada lahayn;

    iii. Barnaamijyada dhexdhexaadinta asxaabta iyo maxkamadaha dhalinyarada;

    iv. Dheereenta maalinta iyo barnaamijyada kale ee amaanka dugsiga;

    v. La shaqaynta gobolka iyo saraakiisha fulinta sharciga si loo xaqiijiyo:

        1) Shaqaalaysiinta iyo baarista si wax ku ool ah ee saraakiisha amaanka iskoolka iyo shaqaalaha kale ee amniga;

        2) Tababar ku filan oo la siiyo saraakiisha amaanka iskoolka iyo shaqaalaha kale ee amniga, oo ay ku jiraan hababka lagu dejiyo xaaladaha rabshada leh;

        3) Tababar ku filan oo la siiyo saraakiisha amaanka iskoolka iyo shaqaalaha kale ee amniga, oo ay ku jiraan hababka lagu dejiyo xaaladaha rabshada leh;

b. Ka jawaabista hanjabaadaha aan tooska ahayn ama hanjabaada tooska ah, ama falalka rabsho ee ardayda, macalimiinta, shaqaalaha kale ee iskoolka, ama booqdayaasha iskoolka - oo ay ku jiraan hanjabaadyo ay ardayda naftooda u geystaan;

c. La xiriirida saraakiisha fulinta sharciga ee ku haboon hadii ay dhacdo dhacdo rabshado ama xaalad degdeg ah;

d. La xiriirida waalidiinta, mas'uuliyiinta, ama dadka xiriirka waalidka la leh ardayga Degmada ee:

    i. Dhacdo gacan ka hadal ah; iyo/ama
    ii. Hanjabaado toos ahayn ama toos ah oo ardayga ku haayo naftooda, oo ay ku jiraan isdil.

Kormeeraha guud ama wakiilkooda waxaa looga baahan yahay inay ogeysiiyaan waalidiinta, mas'uuliyiinta ama dadka xiriirka waalidka leh waqti ku haboon xaaladaha kor u qaadaayo welwelka muhiimka ah ee amaanka ardayga. Xaaladahaan waxaa ka mid ah xarida ama xukmida xubnaha shaqaalaha ee dembiyada sharciga ah ee tusayso qatarta caruurta.

Habka, nuxurka iyo waqtiga ogeysiinta waa in ay ka tarjumaan la shaqaynta hay'adaha sharciga ah, ilaalinta xuquuqda shaqaalaha, iyo muujinta dhaqanka isgaarsiineed ee wanaagsan.

e. Isku dubaridka khayraadka iyo shaqaalaha Degmada inta lagu jiro xaaladaha degdega ah, oo ay ku jiraan aqoonsiga saraakiisha loo ogolaaday inay go'aanada gaaraan iyo xubnaha shaqaalaha ee loo xilsaaray inay bixiyaan gargaar;

f. Kobcinta amaanka dhismaha iskoolka, oo ay ku jiraan hababka loogu diro saraakiisha amniga iskoolka iyo/ama isticmaalka qalababka ama hababka amaanka;

g. U faafinta macluumaadka macalimiinta, maamulka, shaqaalaha iskoolka, waalidiinta/masuulada, iyo ardayda ee ku saabsan ogaanshaha hore ee dabeecadaha rabshada leh, hordhaca, iyo arimaha qatarta ah;

h. Bixinta tababar sanadeed ah ee amaanka iskoolka iyo shaqaalaha iyo ardayda si waafaqsan sharciga gobolka, oo ay ku jiraan ka hortagga rabshadaha iyo caafimaadka maskaxda;

i. Samaynta gambaleelo iyo howlo kale si loo tijaabiyo qaybaha qorshaha amaanka, iyada oo la isku duba ridaayo gurmadka degdega ah ee deegaanka iyo degmada;

j. Aqoonsiga jawaabaha ku haboon xaaladaha degdega ah ee kala duwan, oo ay ku jiraan hanjabaad bam, toogashooyinka, la qabsashada, faragelinta iyo afduubka;

k. Aqoonsiga xeeladaha fududaynta iyo wanaajinta xiriirka iyo soo sheegida dhacdooyinka rabshada leh, sida barnaamijyada ay dhalinyarada sameeyaan, dhexdhexaadinta asxaabta, xalinta qilaafaadka, golayaasha ama hagayaasha ardayda ay qusayso cagajuglaynta ama rabshadaha, iyo hababka soo sheegida sida qarsoodiga ah;

l. Sharaxaada waajibaadka ka saaran dhamaan shaqaalaha amniga iyo badbaadada iskoolka, oo ay ku jiraan habka shaqaalaynta iyo hubinta iyo tababarka looga baahan yahay; iyo

m. Ogeysiinta dhamaan iskoolada Degmada ku yaalo masiibo, dhacdo rabshado wato, ama xaalad degdeg ah.

Qorshaha Amaanka Degmada oo dhan iyo wixii cusbooneeysiin/wax ka bedelid ah waa in ay qaataan Gudiga Waxbarashada. Si loogu ogolaado shaqaalaha iskoolka, ardayda, waalidiinta, iyo kuwa kale ee danaynaayo inay ka qaybqaataan samaynta Qorshaha, ugu yaraan 30 maalmood ee mudada ra'yiga dadweynaha iyo hal dhegaysi dadweyne waa in la qabtaa ka hor inta oo Gudiga ansixinin. Qorshaha iyo wixii cusbooneeysiin/wax ka bedelid ah waa in loo gudbiyaa Gudoomiyaha Waxbarashada NYS 30 maalmood gudahooda ka dib marka la soo saaro.

**3. Madaxa Gurmadka Degmada**

Kormeeraha Guud ee Iskoolada ama cida ay u xilsaaran yihiin ayaa noqon doono Sarkaalka Sare ee Gurmadka Degmada Degdega ah. Sarkaalka Sare ee Gurmadka Degdega ah ayaa mas'uul ka ah:

a. Isku dubaridka xiriirka ka dhexeeyo shaqaalaha iskoolka, sharci fulinta, iyo jawaabayaasha kale ee ugu horeeyo;

b. Hubinta Kooxda Amaanka Degmada oo dhan:

   i. Waxoo dhamaystiraa Qorshaha Amaanka Degmada oo dhan, waxoo sameeyaa dib u eegis sanadeed, iyo cusbooneysiiyaa Qorshaha sida loogu baahan yahay si loogu ogolaado waqti jawaabcelinta dadweynaha iyo dhegeysiga dadweynaha ka hor inta Gudiga texgelinin qaadashada; iyo

   ii. Isku dubaridaa Qorshaha Degmada oo dhan iyo Qorshayaasha Ka jawaabista Degdega ah ee Heerka Dhismaha.

c. Hubinta in dhamaan Qorshayaasha Jawaab celinta Degdega ah ee Heerka Dhismaha la dhamaystiro, dib loo eego sanad walbo, iyo la cusboonaysiiyo hadii loo baahdo;

d. Isku dubaridka amaanka haboon, badbaadada, iyo tababarka degdega ah ee Degmada iyo shaqaalaha iskoolka;

e. Caawinta xulashada tiknoolajiyada la xiriiro amaanka iyo hormarinta hababka isticmaalkeeda; iyo

f. Xaqiijinta in dad guureynta, hoyga, iyo gambaleelada qufulada lagu sameeyo dhamaan dhismayaasha Degmada, sida uu qabo Sharciga Waxbarashada Gobolka New York.

Kormeeraha guud waxa uu hubin doonaa in macluumaadka qoran ee hababka xaaladaha degdega ah la siiyo dhamaan ardayda iyo shaqaalaha bilawga sanad dugsiyeed kasto taariikhda loo qoondeeyey ee sharciga iyo qaanuunka.

***<u>Qorshayaasha Jawaabista Degdega ah ee Heerka Dhismaha</u>***

Qorshayaasha Jawaabcelinta Degdega ah ee Heerka Dhismaha waa sir, iyo waxaa kaliya loo sheegi karaa waaxyaha ama shaqaalaha iskoolka iyo saraakiisha sharci fulinta.

**1. Kooxaha Ka Jawaabista Xaalada Degdega ah ee Heerka dhismaha**

Koox kasto ee Jawaabcelinta Degdega ah ee Heerka Dhismaha ayaa mas'uul ka ah inay hormariyaan Qorshaha jawaabcelinta Degdega ah ee Heerka Dhismaha, iyo dib u eegista Qorshaha sanad kasto si loo go'aamiyo baahida loo qabo cusbooneysiinta ama wax ka bedelka. Qorshaha waa in wax laga qabto ka hortaga dhibaatooyinka iyo faragelinta iyo ka jawaabista xaaladaha degdega ah ee heerka dhismaha.

Xubnaha Kooxda Jawaabcelinta Degdega ah ee Heerka Dhismaha waa in uu magacaabo maamulaha iskoolka, iyo waa in lagu daraa:

a. Wakiil macalin, maamul, iyo wakiilada ururka waalidka;
b. Shaqaalaha amaanka iskoolka;
c. Shaqaalaha caafimaadka maskaxda
d. Shaqaalaha kale ee iskoolka
e. Xubnaha bulshada; iyo

f. Xoojinta sharciga deegaanka, ambalaaska, saraakiisha ilaalinta dabka, iyo wakaaladaha kale ee ka jawaabcelinta xaaladaha degdega ah

Koox kasto ee ka Jawaabcelinta Xaalada Degdega ah ee Heerka Dhismaha ayaa sidoo kale mas'uul ka ah magacaabista:

a. Kooxda Jawaabcelinta Xaalada Degdega ah waxa ay caawiyaan bulshada iskoolka si ay ugu jawaabaan shil ama xaalad degdeg ah oo soo baxdo. Kooxdaan waxaa ku jiri doono shaqaale iskoolka iyo wakiilo ka socdo sharci fulinta, ilaalinta dabka, iyo deegaanka, gobolka iyo/ama wakaaladaha ka jawaabista degdega ah ee dowlada; iyo

b. Kooxda Jawaabcelinta Dhacdada Kadib waxa ay caawiyaan bulshada iskoolka sidii ay ula qabsan lahaayeen ka dib shilka ama xaalad degdeg ah. Kooxdaan waxaa ku jiri doono shaqaale iskoolka, shaqaale caafimaad, lataliyayaasha caafimaadka maskaxda, iyo shaqaalaha kale ee xiriirka la leh.

**2. Qorshayaasha Ka Jawaabista Xaalada Degdega ah ee Heerka Dhismaha**

Qorshayaasha Jawaabta Degdega ah ee Heerka Dhismaha waa sir, iyo waxaa kaliya lala wadaagi karaa waaxda ama shaqaalaha iskoolka iyo saraakiisha sharci fulinta.

Qorshayaasha waa in ay ku jiraan:

a. Nidaamyada sida looga jawaabaayo xaaladaha degdega ah ee kala duwan, sida kuwa u baahan dad gureynta, hoy iyo quful. Nidaamyadaan waa inay ugu yaraan ku jiraan:

   i. Wadooyinka dad guureynta iyo goobaha hoyga; iyo
   ii. Hababka sida wax looga qabto baahiyaha caafimaadka, gaadiidka, iyo ogeysiinta waalidiinta iyo mas'uuliyiinta

b. Qorshayaasha dhulka, borotokoolka, naqshadaynta ama maabyada kale ee gudaha iskoolka, barxadaha iskoolka, iyo khariidadaha wadooyinka ee agagaarka ku wareegsan;

c. Sharaxaada hababka isgaarsiinta gudaha iyo dibada ee loo isticmaalo xaaladaha degdega ah;

d. Qeexida silsilada amarka, oo waafaqsan Nidaamka Maareynta Dhacdooyinka Isdhexgalka Qaranka;

e. Isku dubaridka qorshaha gobolka oo dhan ee adeegyada caafimaadka maskaxda si loo xaqiijiyo in iskoolka heli karo khayraadka caafimaadka maskaxda ee federaalka, gobolka iyo deegaanka hadii ay dhacdo dhacdo rabshado wato;

f. Hababka dib u eegista sanadlaha ah iyo cusboonaysiinta Qorshaha Ka jawaabista Xaalad Degdega ah ee Heerka Dhismaha;

g. Hababka loo sameeyo gambaleelada iyo howlaha kale si loo tijaabiyo Qorshaha Ka jawaabcelinta Xaalad Degdeg ah ee Heerka Dhismaha iyo dib u eegista natiijooyinka tijaabooyinka si loo go'aamiyo baahida loo qabo in wax laga bedelo hababka iyo/ama Qorshaha Jawaabcelinta Degdega ah;

h. Nidaamyada lagu sugaayo iyo lagu xadiadayo gelitaanka goobta dembiga si loo ilaaliyo cadeymaha hadii ay dhacdo baaris sharci fulin; iyo

i. Macluumaadka ku saabsan dadweynaha iskoolka, tirada shaqaalaha, baahida gaadiidka, iyo nambarada telefoonada si loola xiriiro saraakiisha muhiimka ah.

Qorshe kasto ee Ka Jawaabista Xaalad Degdeg ah ee Xaalada Dhismaha iyo cusboonaysiinta waa in lagu buuxiyaa wakaalada fulinta sharciga deegaanka ee ku haboon iyo booliiska gobolka 30 maalmood gudahooda ee marka la qaatay.

**3. Hababka Gambaleelada Xaalada Degdaga ah lagu Tijaabinaayo**

Maamulaha ama maamulka dhismaha ayaa mas'uul ka ah hubinta in shaqaalaha iyo ardayda helaan tilmaamo iyo tababar si ay awood ugu yeeshtaan inay si haboon ugu jawaabaan xaaladaha degdeg ah waqtiga ugu yar ee suurtogalka ah oo aan jahawareer ama argagax lahayn.

Ugu yaraan hal mar sanad dugsiyeedka, Degmad waxaa looga baahan yahay inay samayso tijaabo habraacyada hoos imaado ee Qorshayaasha Jawaacelinta Xaalad Degdeg ah ee Heerka Dhismaha, oo ay ku jiraan hoy, quful, ama fasax waqti hore. Tijaabada waa in la sameeyaa wax aan ka badnayn shan iyo toban daqiiqo ka hor waqtiga fasaxa caadiga ah. Ujeedada tijaabadaan waa in la baaro waxtarka nidaamka isgaarsiinta iyo gaadiidka inta lagu jiro xaaladaha degdega ah. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta waa in la ogeysiiyaa ugu yaraan hal usbuuc ka hor tijaabada.

Dhismayaasha Dugsiga Degmada Magaalada Rochester waxay qaban doonaan ugu yaraan 12 gambaleelo sanadle ah sanad kasto:

a. 8 ka mid ah 12 da gambaleel waxay noqon doonaan gambaleelo banaanka loo baxo (2 ka mid ah 8 da gambaleelada banaanaka loo baxaayo waxaa la isticmaali doonaa hab kale);

b. 4 ka mid ah 12 da gambaleel ee sanadlaha ah waa inay noqdaan gambaleelo quful ah;

c. 6 ka mid ah 12 da gambaleel waa in la dhameeyaa 31 ga Diseembar sanad kasto, inta soo hartayna waa in la dhameeyaa 1 da April.

Tababarada qaar waa la sheegi doonaa iyo qaar kale mala sheegi doono iyo waxaa la qaban doonaa waqtiyo kala duwan oo maalinta iskoolka ah. Ardayda waa inay helaan tilmaamo ku saabsan sida si amaan leh lagu bixiyo xiliga xisidaha ay wax cunaayaan ama baranaayaan.

Barnaamijyada xiliga xagaaga waxaa looga baahan yahay inay dhamaystiraan labo gambaleel ee banaanka loo baxaayo, mid ka mid ah waa in la qabtaa isbuuca ugu horeeyo ee barnaamijka.

Shaqsiyaadka mas'uulka ka ah barnaamijka iskoolka ka dib, munaasabad, ama waxqabad waxaa looga baahan yahay inay ogeysiiyaan dadka soo xaadiraayo nidaamyada la raacaayo xaalad degdeg ah. Ogeysiiskaan waxaa la bixin doonaa bilowga barnaamijka, waxqabadka, ama munaasabada.

| | |
|---|---|
| Tixraac aan toos aheyn: | Siyaasada Degmada ee Mamnuucayso Takoorka ama Dhibaataynta Ardayda ama Shaqaalaha (0100)<br>Dhibaataynta Galmada (0110)<br>Kahortaga iyo Siyaasada ka Hortaga Dhibaataynta iyo Cagajuglaynta Ardayga (0115)<br>Soo booqdayaasha Iskoolka (1240)<br>Xeerka Anshaxa (1400)<br>Xeerka Qiimaynta Qatarta (1400-R)<br>Dhaqanka Dadweynaha ee Hantida Iskoolka (1520)<br>Siyaasada Socodka iyo Dhaqdhaqaaqa (4240)<br>U qalmitaanka Hawlaha Manhajka ka Baxsan (5305)<br>Iskoolada Daroogada ka Baxsan (5312.1a)<br>Siyaasada Ku Saabsan Dejinta Xaaladaha Dhibaatada (8200) |
| Tixraac: | Sharciga Waxbarashada Gobolka New York 2801-A<br>Qaybta Sharciga Waxbarashada Gobolka New York § 807.1 iyo § 807.1.a<br>May 2016, Waaxda Waxbarashada Gobolka New York, Field Memo ee Kaaliyaha Gudoomiyaha, Xafiiska Adeegyada Taageerada Ardayga, Renee Rider<br>Agoosto 2016, Waaxda Waxbarashada Gobolka New York, Field Memo ee Kaaliyaha Gudoomiyaha, Xafiiska Adeegyada Taageerada Ardayga, Renee Rider |
| Xasuus qoraal: | Siyaasadii hore, Buuga Siyaasada, Qorshaha Amaanka Iskoolka ee Dhamaystiran (Diseembar 7, 1995), dib loo eegay; Wax laga bedelay Diseembar 16, 2010 iyadoo la raacaayo Qaraarka No. 2010-11: 434; Wax laga bedelay Luuliyo 29, 2013 iyadoo la raacaayo Qaraarka No. 2013-14: 83; Wax laga bedelay Nofeembar 17, 2016 iyadoo la raacaayo Qaraarka No. 2016-17: 370; Wax laga bedelay Maajo 23, 2019 iyadoo la raacaayo Qaraarka No. 2018-19: 919; Wax laga bedelay Maarso 23, 2023 iyadoo la raacaayo Qaraarka No. 2022-23: 555 |

ct/sg